



**Daabacaadda iy Taariikhda Xaqa Daabacaadda:** Minnesota Humanities Center, 2007

**Hordhac:** Buuggan waa sheeko xariiro Soomaaliyeed oo dib loo soo tebinayo. Dad-qalatadii Dhegdheer waxay raadinaysaa wax ay cunto. Waxay eryenaysaa hooyo iyo wiilkeeda iyadoo doonaysa inay cunto. Waa sheeko ka tarjumaysa lagdanka u dhexeeya xumaanta iyo samaha, samaha ayaana ugu danbaynta guuleysanaya. Sheekadan waa mid ka mid ah afar sheeko xariirooyin Soomaaliyeed oo labo luqadood ku qoran, sawiranna, uuna daabacay Barnaamijka Buugaagta ku Qoran Laba Luqadood ee Hay'adda Minnesota Humanities Center. Hadii aad doonaysid akhbaar dheeraad ah, booqo websaydka: [www.mnhum.org/somalibooks](http://www.mnhum.org/somalibooks).

**Da'da loogu talagalay:** 4-6, 7-10

**Habka loo**

**akhrinayo sheekada:** Khariidada tus carruurta si'ay u tilmaamaan meesha ay Soomaaliya ku taal.

Akhri sheekadaan marka aad akhrinayso sheekooyinka kale ee cabsida leh sida Hansel ama Gretel ama Jack iyo the Beanstalk. Is barbar dhig sheekooyinka. U adeegso sheekooyinka si'aad isu barbardhigto xaqiiqda iyo khiyaaliga.

Erayada Dhegdheer iyo Bowdheer waxaa Af-Ingiriisi ahaan loogu dhawaaqaaa:

Dhegdheer (Deg/Dur); Bowdheer (Bo/dare).

Akhri "erayga qoraaga" inta aadan sheekada u akhrin carruurta.

Sheekada oo dhan hal luqad ku akhri si fahmideedu u sahlanaado. Hadii qofka akhrinaya uusan ku hadlin labo luqadood, isticmaal cajaladda duubista ay ku duuban yihiin sheekadii oo labada luqadoodba ah ee ay soo saartay Hay'adda Minnesota Humanities Center ([www.mnhum.org/somalibooks](http://www.mnhum.org/somalibooks)).

**Su'aalaha inta aadan akhrin:**

Ma ka hadli kartaa qofka sheekadu ku saabsantahay ee Dhegdheer adoo fiirinaya sawirka buugga ku kor sawiran?

*Dhegdheer* waxaa kaloo loo yaqaan sheeko xariiro Soomaaliyeed oo cabsi leh. Ma jeceshahay sheekooyinka cabsida leh? Tee ugu jeceshahay sheekooyinka cabsida leh?

**Waxaad sheekadaku**

**bilowdaa:**

Sheekadani waa sheeko ku saabsan naag laga cabsado oo la dhaho Dhegdheer. Waxay rabtaa inay soo qabato naag iyo wiilkeed dabadeedna ay cunto. Bal aan aragno in naagtaas iyo wiilkeedu ka baxsadaan...

## Su'aalaha marka

**sheekada la akhriyo:** Ma ka cabsanaysaa Dhegdheer? Ma u malaynaysaa inay ahayd qof run ah? Sabab?

Sidee naagta iyo wiilkeedu uga fakadeen Dhegdheer? Maxay Dhegdheer u samayn wayday sidaasoo kale oo ay u baxsan wayday?

Fiiri sawirada dhulka ee ku yaal bilowga iyo dhamaadka buugga. Maxaa ku dhacay dhulka ka dib dhimashada Dhegdheer?

## Waxyaabo Kaleoo Sheekada La Xiriira

**Farshaxanka:** Samee warqadda bogga lagu calaamadeeyo “bookmark” adoo koobinaya mid ka mid ah sawirada buugga ku jira. (tusaale ahaan erayga qoraaga ama bogga ugu dambeeya). Kallarada “crayon” ama rinji isticmaal.

**Jilidda:** Carruurta ha u labistaan qaabka sheekada, hana jilaan. Samee boombaleyaal, si ay carruurta sheekada u jilaan ayagoo boombalayaasha isticmaalaya.

**Luqadda:** Carruurta ha sheegaan ereyo lid ku ah kuwa aad sheekada kasoo xulatay sida (caato – buuran, xoog badan – tabar yar, weyn – yar, faq – qayli, iwm).

Sheekadan waa mid laga sheekayn jiray oo aan qornayn, sidaa daraadeed waxaa dhici karta in qofba si gooni ah u maqlay. Carruurta ha bartaan sida sheeko looga sheekeeyo ayagoo sawirada fiirinaya, oo isku dayaya inay sheegaan waxay sheekada ka xasuustaan. U ogolow inay carruurta wax ka badalaan marka ay ka sheekaynayaan sheekada iyo inay dhamaadka sheekada si kale ka dhigaan. Carruurta sheekada ha u sheegaan ardayda fasalka ama qeyb ka mid ah ardayda.

**Qoraalka:** Carruurta ha doortaan sawirada mid ka mid ah, dabadeedna qoraal ha ka sameeyaan, fasalkana ha u akhriyaan iyagoo ardayda kale waydiinaya inay tilmaamaan sawirka ay ka hadlayaan.

**Waxyaabo kale:** Si aad u heshid fikrado kale kale oo aad isticmaali kartid, fiiri websaydka:

[http://edsitement.neh.gov/view\\_lesson\\_plan.asp?id=240](http://edsitement.neh.gov/view_lesson_plan.asp?id=240)

**Talooyin la siinayo kuwa barta af-Ingiriiska:** Carruurta sheekada oo kooban ha ka sheekeeyaan. Ku qor qormooyin gaagaaban oo ardaydu ugu isticmaali karaan inay sheekada ku soo celiyaan ayago kuligood ka qeyb qaadanaya.

Ka codso in ardayda ama waalidka Soomaalida ah ay ka qeyb qaataan sheekada.

## Buugaag la xiriirta sheekada

**Qeyb Libaax/The Lion's Share\*** waxaa qoray Saciid Saalax Axmed, sawiradana waxaa u sameeyey Kelly Dupre (2007)

**The Travels of Igal Shidaad\*** waxaa qoray Kelly Dupre, sawirada waxaa u sameeyey Amin Amir (2008)

**Wiil Waal: A Somali Folktale\*** waxaa qoray Kathleen Moriarty, sawirada waxaa u sameeyey Amin Amir (2007)

**Hansel and Gretel** waxaa qoray Rika Lesser, sawiradana waxaa u sameeyey Paul O. Zelinsky (1999)

**Jack and the Beanstalk** waxaa qoray Stephen Kellogg (1991)

\*Waxaa daabacday Minnesota Humanities Center.